



NORTHEAST METRO
Intermediate School District

916

partners in education

Buug Tusmeedka Degmada

ee Ardayda iyo Qoysaska/Daryeeleyaasha



Sanad Dugsiyeedka 2023-2024

Northeast Metro 916 Intermediate School District
2540 County Road F East | White Bear Lake, MN 55110

Liiska Mawduucyada

Fariin ka timid Kormeeraha Guud ee 916	1
QAYBTA KOOBAAD: XOG GUUD	2
Oo ku saabsan Degmo Dugsiyeedkeena	2
Bayaanka Shaqada	2
Mabaadii'da Northeast Metro 916	2
Degmooyinka Dugsiyada Xubinta Ka ah	3
Aaga Waxbarashada	3
Gudiga Dugsiga 916	4
Xafiisyada Maamulka ee 916	5
Diiwaanka Dugsiga ee 916	5
Jadwalka Dugsiga ee 916	8
Diiwaanka Shaqaalaha	10
Hubinnada Shaqsiyada ee Shaqada	10
Codsashada Shahaadooyinka Macalinka iyo EAS	10
Fursada Waxbarashada Loo Siman yahay	10
Qadada	10
Cimilada xiliga Qaboobaha	11
Maalmaha Waxbarashada Oonlaynka ah	12
Agabka Uusan Dugsigu Bixin	12
Xiriir lala sameeyo Qoysaska	12
Isticmaalka Ardayda iyo Baakinka Gaariyaasha Matoorka leh	12
Badqabka Gaadiidka ee Ardayda	13
Diinta	13
QAYBTA LABAAD: TACLIINTA	13
Diiwaannada Ardayda	13
Shuruudaha Qalin jebinta	13
Tignooloojiyada Casriga ah ee Fasallada	14
QAYBTA SADEXAAD: XEERARKA IYO ANSHAXA	14
Xaadirista	14
Isticmaalka masuuliyadu ku dheehan tahay ee tignooloojiyada	14
Isticmaalka masuuliyada leh ee baraha bulshada	14
Gardarada	15
Ogeysiiska Falka Rabshada leh ee ay Ardaydu gaystaan	15
Anshaxa Ardayda	15
Dhibaataynta iyo Rabshada	15
Burcadnimada	16
Goob ka Caagan Tubaakada	16
Hubka dugsiga	16
Takoor La'aanta Galmada	16

QAYBTA AFRAAD: CAAFIMAADKA IYO BADQABKA-----	17
Habraaca Caadiga ah ee Jawaab celinta-----	17
Maqnaanshiyaasha-----	17
Talaallada-----	17
Daawooyinka iyo Habraacyada-----	17
Khayraadka Caafimaadka Dhimirka: Care Solace-----	18
Khayraadka Caafimaadka Dhimirka: Shabakada Adeegyada Dhalinyarada-----	18
Khayraadka Caafimaadka Dhimirka: Laynka Isdilka iyo Masiibada-----	18
U qalmida Caymiska Caafimaadka ee Minnesota Care-----	18
Yareynta Shilalka iyo Dhaawaca-----	19
Warbixinta qasabka ah-----	19
Baarisiyada-----	19
Baaritaannada Daroogada ee Qori tuurka ah-----	19
Maadooyinka sunta ah-----	20
Tayada hawada gudaha-----	20
QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA BULSHADA-----	20
Xeerarka Xogta ee Ogeysiiska Dadwaynah ee FERPA-----	20
Ogeysiiska Xog Uruurinta ee ku cad Ogeysiiska Dadwaynaha ee PPRA-----	21
Ogeysiiska PPRA ee Ogolaanshaha/Diidista Hawlaha Gaarka ah-----	21
Xogta Codsiyada Nidaamka Cadaalada Carruurta-----	21

Ogoow: Buug tusmeedkaan ayaa mararka qaar wax laga badeli karaa haddii Minnesota Department of Education (Waxda Waxbarashada Minnesota) ama Northeast Metro 916 ay wax isbadello ah ku samayso xeerarka ku qoran buug tusmeedkaan. [Si aad u hesho liiska buuxa ee xeerarka, fadlan guji halkaan.](#)

Fariin ka timid Kormeeraha Guud ee 916

Ku soo dhawaada sanad dugsiyeedka 2023-2024!

Inaan noqdo Kormeeraha Guud ee 916 iyo inaan la shaqeeyo shaqaalaha oo ah macalimiinta waxbarasho la isku haleyn karo sharaf ayay ii tahay. Si wayn ayaan ugu faraxsan nahay kooxda macalimiinta iyo taageerada ay maalin kasta baxshaan. Shaqadeena bixinta adeegyada heerka sare ah ee waxbarashada ayaa sharaf noo ah waana masuuliyad wayn. Macalimiinteena xirfada sare leh ayaa door muhiim ah a ciyaara bixinta xalal hal abuur leh oo ku xiran baahiyaha ardaydeena iyo iyo degmooyinka xubinta ka ah.



Sanad dugsiyeedka soo socda, diiradeena ayaa noqonaysa tiir dhexaadka shaqadeena, **Farxad iyo Kalsooni: Khibrada 916**. Anagoo sii wadna inaan ku shaqeyno talaabooyinka istaraatiijiga ah ee 916, waxaan xoojinaynaa in si gaar ah diirada loo saaro guusha arday kasta. Sinaanta ayaa qayb muhiim ah u ah dedaalkeena xaqiijinta in arday kasta uu helo taageerada uu maalin kasta u baahan yahay. Waxaan si adag u aaminsan nahay in marka ardaydu ay dareemaan in loo jeedo, la dhagaysanaayo, lana qadarinaayo ayagoo la siinaayo qorsheyaal waxbarasho oo gaar ah oo isku dabaqaaya khibradahooda gaarka ah ee nololaha iyo awoodahooda, inay helaan farxad iyo kalsooni. Guusha, ka qaybgalka, farxada, qadarin, dhiiri gelin, iyo kalsooni ayaa ah shucuurta ardaydeenu ay tahay inay dareemaan maalmahooda ugu wanaagsan ee dugsiya. Sidaas awgeed, waa muhiim in diirada la saaro fikradaha ardayda ee ku xeeran abuurista goob waxbarasho oo loo dhan yahay lehna taageero taasoo diirada saaraysa dareenka kamid ahaanshaha, maadaama ay qayb aasaasi ah u tahay waxbarasho tayo leh. Kor u qaadista fariimaha xoojinta fahanka ardayda ee kamid ahaanshaha ayaa ka dhigaysa inay dareemaan jir ahaan iyo shucuur ahaanba badqab.

Waxaan aqoonsan nahay muhiimada balaarinta dedaaladeena si aan ula shaqayno ardayda iyo qoysaska. Waxaan ku casuumaynaa qoysaskeena iyo ardayda 916 inay nagala shaqeeyaan dhisida goobaha ee waxbarashada iyo qorsheyaasha waxbarasho qaas ah. Waxaan higsanaynaa in arday kasta uu dareemo farxad, kalsooni, iyo rajo wanaagsan oo mustaqbalka ah. Waxaan ka rajaynayaa sanad dugsiyeedka soo socda mid hormar badan anagoo ku dedaalayna abuurista arday farxad iyo kalsooni leh iyo qoysas faraxsan.

Daacadnimo,

Dr. Val Rae Boe, Kormeeraha guud

QAYBTA KOOBAAD: XOG GUUD

Oo ku saabsan Degmo Dugsiyeedkeena

Degmo Dugsiyeedka Northeast Metro 916 waa mid kamid ah afarta degmo dugsiyeed ee madaxa banaan ee Minnesota oo bixisa barnaamijyada gaarka ah iyo kuwa wadaaga ah oo ay ku jiraan waxbarashada shaqada iyo farsamada, adeegyada waxbarashada gaarka ah, xarumaha waxbarashada ee aaga, iyo barnaamijyada daryeelka iyo daawaynta.

Degmo dugsiyeedyada gaarka ah waa dugsiyo ama barnaamijyo gaar ah oo baxsha adeegyada waxbarashada ardayda ee la qeexay siiyana koox kamid ah degmo dugsiyeedyada "xubinta" ka ah. Minnesota waxay leedahay afar degmo dugsiyeed gaar ah (916, 917, 287, iyo 288) kuwaasoo u adeegga in ka badan 20,000 oo arday sanad kasta.

Bayaanka Shaqada

Degmo Dugsiyeedka Gaarka ee Northeast Metro 916 waxay ka jawaabtaa baahiyaha gaarka ah ee ardayda, macalimiinta, iyo degmooyinka dugsiga ayadoo adeegsanaysa hal abuur, tayo, iyo khibrad la isku halayn karo.

Mabaadii'da Northeast Metro 916

Sharafka: Habdhaqan ku saleysan mabaadii'da "Samaynta waxa saxda ah xataa marka uusan qofna ku waardiyaynayn."

Isla xisaabtanka: U shaqeynta qaab ka sareeya heerka caadiga ah si aan ua deegsano khyaraadka aan ku gaareyno guulaha ugu sareeya ee ardayda iyo saamileeyda.

Qadarin: Bii'o soo dhawayn leh oo farqiyada shaqaalaha, ardayda, iyo degmooyinka lagu qadarinaayo hormarka ay ku soo kordhiyaan dooda, go'aannada, iyo barnaamijyada.

Wada shaqeyn: Kala shaqaynta waalidiinta/daryeeleyaasha, qoysaska, ardayda, degmooyinka, iyo wakaaladaha kale abuurista barnaamijyada ardayda oo wax ku ool ah oo macno leh.

Hal abuurka: Barnaamijyada iyo adeegyada gaarka ah, sida gaarka loo naqshadeeyay iyo bixinta.

Degmooyinka Dugsiyada Xubinta Ka ah

Northeast Metro 916 waxay u adeegtaa ardayda iyo qoysaska ku nool mid kamid ah 13 degmo dugsiyeed:

1. Centennial #12
2. Columbia Heights #13
3. Forest Lake #831
4. Fridley #14
5. Mahtomedi #832
6. Mounds View #621
7. North St. Paul - Maplewood - Oakdale #622
8. Roseville #623
9. South Washington County #833
10. Spring Lake Park #16
11. St. Anthony - New Brighton #282
12. Stillwater #834
13. White Bear Lake #624

Aaga Waxbarashada

Xarumaha Waxbarashada Aaga (ALCs)

Xarumaha Waxbarashada Aaga (ALCs) waxay ka caawiyaan ardayda inay gaaraan higsiyadooda waxbarashada iyo shaqada ayagoo jooga goob waxbarasho oo ka baxsan tan caadiga ah. Sadex meelood ayaa baxsha manhajka dugsiya sare oo balaaran oo adag laguna baxsho goob gaar ah, isbadel leh, oo kobcin leh. Ardayda ayaa hela caawimaad ku aadan buuxinta shuruudaha qalin jebinta waxayna fursado u helaan barashada xirfado shaqo iyo khibrad shaqo.

Daryeelka iyo Daawaynta

Northeast Metro 916 waxay siisaa adeegyada waxbarashada ardayda daryeelka ka helaaya isbitaallada ama xarumaha daawaynta caafimaadka dhimirka.

Barnaamijyada daryeelka iyo daawaynta ayaa gacan ka gaysta xaqiijinta in ardaydu

aysan lumin masuuliyada higsiyada waxbarashadooda ayagoo haddana helaaya daawayn meel ka baxsan dugsiyadooda caadiga ah.

Waxbarashada Xirfada iyo farsamada

Ayadoo ku taalla xarunta bari ee Century College, Xarunta Xirfada iyo Farsamada ee 916 waxay bixisaa fursadaha gaarka ah ee wax ku oolka ah ee gacan qabashada leh kuwaasoo u sahlaaya ardayda fasallada 11-12 inay ka qaybgalaan dugsiyada si yeeshaan hami ayagoo haddana helaaya shahaadada dugsiya sare iyo kuleejka oo lagu siinaayo goobta uleejka. Ardaydu waxay dhigtaan casharo labo saac socda xarunta dhexdeeda inta lagu jiro maalinta dugsiya.

Waxbarashada Gaarka ah

Barnaamijyada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada lagu baxsho 916 ayaa si gaar ah diirada u saara ka jawaabida baahiyaha ardayda degmo dugsiyeedyada xubnaha ka ah barnaamijkeena ee qaba baahiyaha ugu adag. Goobaha waxbarashada oo aadka u nidaamsan, lehna taageerada ayaa ka caawiya ardayda inay gaaraan higsiyadooda tacliinta, bulshada, shucuurta, habdhaqanka, iyo isgaarsiinta.

Gudiga Dugsiga 916

Gudiga dugsiga oo ka kala socda 13ka degmo dugsiyeed ee xubnaha ka ah ayaa maamula Northeast Metro 916. Xubin kasta waxaa soo magacawda degmada xubinta ka ah ee uu matalo. Kulannada gudiga ayaa la qabtaa arbacada koobaad ee bil kasta markay saacadu tahay 6 p.m. waxaana lagu qabtaa District Office, 2540 County Road F East, White Bear Lake.

Marilynn Forsberg, *Chair* | Spring Lake Park

Laura Palmer, *Gudoomiye Ku xigeen* | Columbia Heights

Kathleen Daniels, *Qasnajiga* | White Bear Lake

Lucy Payne, *Clerk* | Mahtomedi

Mannix Clark | Roseville

Melinda Dols | South Washington County

Katie Hockert | Stillwater

Tom Knisely | Centennial

Laura Oksnevad | St. Anthony-New Brighton

Avonna Starck | Fridley

Gail Theisen | Forest Lake

Sandra Westerman | Mounds View

Michelle Yener | North St. Paul-Maplewood-Oakdale

Xafisyada Maamulka ee 916

Xafiiska Maamulaha Guud

District Office | 2540 County Road F East, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5657

Isgaarsiinta

District Office | 2540 County Road F East, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5607

Adeegyada Waxbarashada

Quora Education Center | 70 W County Road B2, Little Canada, MN 55117 | 651-415-5409

Dhaqaalaha iyo Shaqooyinka

District Office | 2540 County Road F East, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5591

Waaxda Shaqaalaha

District Office | 2540 County Road F East, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5659

Waxbarashada Gaarka ah

District Office | 2540 County Road F East, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5659

Tignooloojiyada

Quora Education Center | 70 W County Road B2 Little Canada, MN 55117 | 651-415-5400

Diiwaanka Dugsiga ee 916

Xarumaha Waxbarashada Aaga (ALCs)

916 Mahtomedi Academy

2735 County Rd D, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5680

Michelle Baland, Maamulaha guud

East View Academy

Quora Education Center | 70 W County Rd B2, Little Canada, MN 55117 | 651-415-5363
Doug Surgenor, Maamule

Metro Heights Academy

7122 University Ave NE, Fridley, MN 55432 | 651-415-5690
Crystal Tucker, Maamule

Daryeelka iyo Daawaynta

Aris

2040 Woodwinds Drive, Woodbury, MN 55125 | 651-259-9750
Michelle Baland, Maamulaha guud

Willows oo ka tirsan Avanti Center

10300 Flanders St NE, Blaine, Minnesota 55449 | 763-230-7470
Michelle Baland, Maamulaha guud

Waxbarashada Xirfada iyo Farsamada

Xarunta Xirfada iyo Farsamada ee 916

Xarunta Bari ee Century College
3300 Century Ave N, Lot G, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5537
Jill Stewart-Kellar, Kaaliyaha Agaasimaha Waxbarashada Xirfada iyo Farsamada

Waxbarashada Gaarka ah

Barnaamijka Maqalka/Afka

Stillwater ECFC | 1111 Holcombe St South, Stillwater, MN 55082 | 651-351-4036
Jay Fehrman, Maamule

Bellaire Education Center

2540 County Rd F East, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5530
Tammy Bednar, Maamule

Karner Blue Education Center

3764 95th Ave NE, Circle Pines, MN 55014 | 651-415-6200
Jasmine Smith, Maamule

Pankalo Education Center

8568 Eagle Point Blvd, Lake Elmo, MN 55042 | 651-415-6300
Amy Johncox, Maamule

Project Return

Bellaire Education Center | 2540 County Rd F East, White Bear Lake, MN 55110 |
651-415-5530
Tammy Bednar, Maamule

Quora Secondary School

Quora Education Center | 70 W County Rd B2, Little Canada, MN 55117 | 651-415-5438
Kristin Salava, Maamule

South Campus Education Center

3551 N McKnight Rd, White Bear Lake, MN 55110 | 651-415-5440
Jillian Campbell, Maamule

Work Experience Life Skills (WELS) North

3500 Willow Lake Blvd #500, Vadnais Heights, MN 55110 | 651-415-6280
Kristin Salava, Maamule

Jadwalka Dugsiga ee 916

AGOOSTO 2023

SIBTEEMBAR 2023

OKTOOBAR 2023

Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30

Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
1	2	3	4	5	6	7
8	9	10	11	12	13	14
15	16	17	18	19	20	21
22	23	24	25	26	27	28
29	30	31				

NUFEEMBAR 2023						
Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

DISEEMBAR 2023						
Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30
31						

JANAAYO 2023						
Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
	1	2	3	4	5	6
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30	31			

FEBRAAYO 2024						
Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
				1	2	3
4	5	6	7	8	9	10
11	12	13	14	15	16	17
18	19	20	21	22	23	24
25	26	27	28	29		
MAAJO 2024						

MAARSO 2024						
Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
					1	2
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30
JUUN 2024						

ABRIIL 2024						
Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
31	1	2	3	4	5	6
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30				
LUULIYO 2024						

Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
			1	2	3	4
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
						1
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29

Sa bti	Isn iin	Tal aa do	Ar ba co	Tal aa do	Ji mc e	Sa bti
30	1	2	3	4	5	6
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30	31			

Liiska Jadwalka:

Buluug = Maalinta Dugsiga

Cagaar = Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo

Jaalle = Nus Maalin

<p><u>Sibteembar 2023</u> 05: Maalinta Koobaad ee Dugsiga 29: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo</p>	<p><u>Oktoobar 2023</u> 18-20: Fasaxa xiliga Dayrta</p>
<p><u>Nufeembar 2023</u> 06: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo 23-24: Mahadcelinta</p>	<p><u>Diseembar 2023</u> 08: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo 22-31: Fasaxa xiliga Diraacda</p>
<p><u>Janaayo 2024</u> 01: Fasax - Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo 15: Fasax - Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo 16: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo</p>	<p><u>Febraayo 2024</u> 16: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo 19: Fasax - Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo</p>
<p><u>Maarso 2024</u> 04: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo 25-29: Fasaxa Gu'ga</p>	<p><u>Abriil 2024</u> 22: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo</p>
<p><u>Maajo 2024</u> 17: Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo 27: Fasax - Ma jiro Dugsi ama Hawlo la qabanaayo</p>	<p><u>Juun 2024</u> 06: Maalinta ugu Danbaysa Guriga (<u>nus maalin</u>)</p>

Diiwaanka Shaqaalaha

[Halkaan guji si aad u hesho diiwaanka buuxa ee shaqaalaha Northeast Metro 916](#)

Hubinnada Shaqsiyada ee Shaqada

Northeast Metro 916 waxay ku samaysaa hubinta taariikhda danbiyada dhammaan codsadeyaasha shaqada iyo qaar kamid ah qandaraasleyaasha madaxa banaan, sida kuwa tooska ula shaqeynaaya ardayda. Degmo dugsiyeedku qasab kama dhigi karo in mutadawiciintu ay soo gudbiyaan xaqiijinta inaysan wax danbiyo ah horey u gelin. Sharciga Minnesota ayaa ka doonaaya maamulka shaqaaleysiinta ee dugsi inuu baaritaanka taariikhda danbiyada ka codsato Kormeeraha Guud ee Laanta La socoshada Danbiyada dhammaan shaqsiyaadka shaqada laga siinaayo dugsi, iyo dhammaan shaqsiyaadka, marka laga reebo mutadawiciinta ardayda ah ee diiwaan gashan, kuwaasoo la siiyay fursad ay adeegyada tababarka waxbarashada ku siiyaan dugsi, ayadoo aan laga eegayn haddii magdhaw la siiyo iyo haddii kale. Shaqada ayaa waafaqsan dhameystirka guusha leh ee hubinta taariikhda danbiyada.

Codsashada Shahaadooyinka Macalinka iyo EAS

Northeast Metro 916 waxay shaqaaleysiisaa macalimiinta iyo EAS ayadoo ku saleynaysa shahaadooyinka badan ee xirfadeed. Haddii waalid ama daryeele uu doonaayo inuu codsato shahaado xirfadeed ee macalin ama EAS, waa inuu la xariiraa [Waxda Shaqaalaha ee 916](#).

Fursada Waxbarashada Loo Siman yahay

Northeast Metro 916 waxay xaqiijisaa in dhammaan ardaydu ay helaan waxbarasho siman. Degmadu cidna uma takoorayso sababo ku saleysan isir, midab, caqiido, diin, wadanka uu kasoo jeedo, jinsiga, aqoonsiga ama tilmaanta jinsiga, xaalada guurka, xaalada waalidnimada, xaalada qusaysa caawimaada dadwaynaha, naafada, dookha galmada, ama da'da. [Xeerka 102: Fursada Waxbarashada Loo Siman yahay](#)

Qadada

Qadada ayaa lagu cuni doonaa aagaga loo asteeyay keliya wayna kala duwanaan doonaan calaa fasal. Ardayda ayaa loo sheegi doonaa xiligooda qadada loo asteeyay maalinta koobaad ee dugsi. Ardayda ayaa qadada ka heli kara dugsi ama waxay qadadooda oo diyaarsan kala imaan karaan dugsi. Caano ayaa la heli karaa si loogu kaabo qadada guriga ay kala yimaadeen.

Cimilada xiliga Qaboobaha

Anagoo ah degmo dugsiyeed gaar ah, go'aanka xirista dugsiyada waa kuwo isku dhafan. Badqabka ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha, gaar ahaana kuwa ku sugaaya astaannada basaska, ayaa mar kasta ah arinta ugu muhiimsan marka go'aanka la gaaraayo. 916 go'aan kuma saleysa heerkul gaar ah ama cabirka barafka dhacaaya laakiin taas badelkeed waxay qiimeysaa arimo badan, ayna ku jiraan heerkulka, hawada qaboow, cadadka barafka, xaaladaha wadooyinka, iyo deegaanka. Adeegga Qaran ee Cimilada ayaa ah isha ugu wayn ee xogta loo adeegsado gaarista go'aankaan.

Sabab la xiriirta in Minnesota mar kasta leedahay cimilo aan la saadaalin karin xiliga qaboobaha, 916 waxay markasta sugtaa ilaa subaxa maalin dugsiyeed kasta kahor intaysan wargelin siin qoysaska. Hase yeeshee, waxaa jiri kara marar dhif ah marka go'aanka ay tahay in lasoo saaro habaynka ka horeeya maalintaas.

Northeast Metro 916 waxay adeegsataa SchoolMessenger si ay u wacdo, fariin qoraal ugu dirto, ayna iimeel ugu dirto qoysaska ayadoo u sheegaysa qoysaska, ardayda, iyo shaqaalaha dugsiya xirista dugsiya iyo xogta kale ee muhiimka ah. Si loo xaqiijiyo inaad hesho ogeysiisyadaan muhiimka ah, fadlan xaqiiji in xogta lagaala xiriiraayo oo sax ah uu kaa hayo dugsiyaaga ama barnaamijka.

Qaababka kale ee dugsiya laga xiriiro waxaa kamid ah:

- Dhageyso oo daawo raadiyaha WCCOO, TV ga, iyo oonlaynka ee ku qoran qaybta Northeast Metro 916.
- Booqo webseedka degmada oo ah www.916schools.org
- Kala soco baraha Facebook iyo Instagram oo ah "916schools."

Xirista dugsiyada ayaa saamaynaysa dhammaan dhismeyaasha iyo barnaamijyada, ayna ku jiraan waxbarashada gaarka ah; daryeelka iyo daawaynta; Xarunta Xirfada iyo Farsamada; xarumaha waxbarashada ee aaga, soo kabista buundada, iyo dugsiya habaynkii; iyo xafisyada maamulka ee degmada.

Qoysasku waxay haystaan dookh! Waxaa markasta jira dookh ah in ardayda guriga lagu hayo haddii aad dareemayso in xaaladuhu aysan badqab ahayn. 916 ayaa gaarta go'aanka ugu fiican ee degmada laakiin waxay qadarinaysaa qiimayntaada maslaxada koobaad ee ardaygaaga. Haddii doorato inaad anardagaaga dugsiya u dirin, fadlan u soo sheeg maqnaanshihiisa xafiiska dugsiya si loo fasaxo.

Maalmaha Waxbarashada Oonlaynka ah

Sharci-dejinta Minnesota ayaa wax ka beddelay dhererka sannad-dugsiyeedka waxayna u baahan yihiin saacado waxbarasho si ay degmooyinka u siiyaan ikhtiyaarka ah inay dejiyaan qorshe-waxbarasho elektaroonig ah ilaa shan maalmood si ardaydu u sii wataan gelitaanka waxbarashada marka dhismayaasha degmada la xiro sababo la xiriira xumaan awgeed. cimilada ama sababo kale. Iyadoo la adeegsanayo hagitaan ka timid Waaxda Waxbarashada ee Minnesota, 916 waxay samaysay qorshe e-learning, kaas oo la waafajin karo si loo daboolo mudnaanta barnaamijka iyo baahiyaha ardayga. Waalidiinta/daryeel bixiyayaasha waxaa la ogeysiin doonaa maalmaha waxbarashada e-e-Learning ka hor inta aan la hirgelin.

Agabka Uusan Dugsigu Bixin

Degmada dugsigu waxay aqoonsan tahay in ardayda iyo shaqaaluhu ay fikirkooda ku cabiri karaan xarunta dugsiga. Difaacaan waxaa ku jira xaqa bixinta, xili macquul iyo meel macquul ah oo loo baxsho qaab macquul ah, agabka uusan dugsigu lahayn. [Xeerka 505: Qaybinta Agabka Uusan Dugsigu Lahayn oo lagu Qaybiyo Dhismeyaasha Dugsiga ayna Qaybiyaan Ardayda iyo Shaqaalaha](#)

Xiriir lala sameeyo Qoysaska

Marka aad 916 siiso taleefankaaga gacanta marka aad isdiiwaan gelinayso/ku soo biirayso, waxaad noo fasaxaysaa inaad hesho fariin qoraal iyo wicitaannada taleefanka ee otomaatiga ah oo ka yimaada 916 kuna soo dhacaaya taleefankaaga. Xariiradaan ayaa muhiim u ah marka xaalad degdeg ah jirto. Qarashaadka ay goostaan fariimaha iyo interneedka ayaa lagaa jari karaa ayadoo ku xiran qorshaha shirkada taleefankaaga. Waad iska joojin kartaa fariin qoraallada ayadoo uga jawaabaaya "stop" fariin qoraal kasta oo aan kuu soo dirno. Si aad iskaga xirto wicitaannada taleefanka, la xiriir Xafiiska Isgaarsiinta oo aad ka helayso 651-415-5607 ama communications@916schools.org.

Isticmaalka Ardayda iyo Baakinka Gaariyaasha Matoorka leh

Xeerka degmada dugsigu waa in la ogolaado cadad kooban oo isticmaalka iyo baakinka gaariyaasha matoorka leh ee ay degmadu la yimaadaan xarumaha dugsiga. Mowqifka degmada dugsigu waa in xeerka cadaalada iyo sinaanka leh ee gaariyaasha matoorka ee ardayda degmada oo dhan uu kor u qaadaayo khibrada tayada waxbarashada ardayda, uu ilaalinaayo kala danbaynta iyo anshaxa dugsiyada, uuna difaacaayo caafimaadka, badqabka, iyo faya dhawrka ardayda iyo shaqaalaha dugsiga. Xeerkaan wuxuu qabanayaa dhammaan ardayda degmada dugsiga. [Xeerka 527: Isticmaalka iyo Baakinka Gaariyaasha Ardayda, Roondada, Kormeerka, iyo Baarista Gaariyaasha](#)

Badqabka Gaadiidka ee Ardayda

Xeerkaan wuxuu siinayaa gaadiid badqab leh ardayda wuxuuna barayaa ardayda arimaha badqabka iyo masuuliyadaha saaran marka ay isticmaalayaan basaska dugsiga iyo gaariyaasha wadaaga ah ee dugsiga. Dhammaan tusaaleyaasha ku jira xeerkaan ee basaska dugsiga waa in lagu daraa gaari kasta oo dugsigu leeyahay oo loo adeegsado qaadista ardayda. [Xeerka 709: Xeerka Badqabka Gaadiidka ee Ardayda](#)

Diinta

Northeast Metro 916 mana faafinayso kamana soo horjeesanayso caqiido diimeed ama diin la'aan. Taas badelkeed, degmada dugsigu waxay ku boorinaysaa dhammaan ardayda iyo shaqaalaha inay tix geliyaan una dul qaataan fikradaha qof kasta. [Xeerka 609: Diinta](#)

QAYBTA LABAAD: TACLIINTA

Diiwaannada Ardayda

Northeast Metro 916 aad ayay uga taxadartaa uruurinta, joogteynta, iyo wadaagista diiwaannada ardayda si waafaqsan sharciga gobalka iyo federaalka. Waa inuu jiraa ogolaansho ka imaanaaya waalidka/daryeelaha (ama ardayga, xaaladaha qaarkood) kahor inta aan diiwaannada waxbarashada la shaacin. [Xeerka 515: Difaaca iyo Sirta Diiwaannada Ardayda](#)

Shuruudaha Qalin jebinta

Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah waa kuwo aad gaar ah, qorshe qalin jebinna waa in lagu daraa Qorshaha Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ee Arday kasta. Xarumaha Waxbarashada ee Aaga (ALCs), ardayda ayaa heli kara dibloomadooda dugsiga caadiga ah ama dibloomada oo ay toos uga helayaan Northeast Metro 916.

Northeast Metro 916 waxay bixisaa nidaamka buundada teeram kasta (50 saacadood = 1.0 dhibcood). Si ay u helaan dibloomada Northeast Metro 916, ardaydu waa inay dhamaystaan 64.5 dhibcood oo ka kooban maadooyinka soo socda:

- Ingiriiska: 12 dhibcood
- Xisaabta: 9 dhibcood (dhameystirka Aljebta II)
- Cilmiga Bulshada: 10.5 dhibcood
- Sayniska: 9 dhibcood

- Farshaxanka: 3 dhibcood
- Maadooyinka Ikhtihaariga ah: 22.5 dhibcood

Tignooloojiyada Casriga ah ee Fasallada

Northeast Metro 916 waxay adeegsataa agabka kaladuwan ee casriga ah si ay u taageerto ardayda. Manhajka, imtaxaanka, iyo aaladaha qiimeynta ayaa la soo gashaa 916schools.org/DistrictApps waxayna sheegayaan xogta ardayda ee aalad kasta. Liiskan ayaa la hayaa loona gudbiyaa sanad kasta qoysaska bilowga sanad dugsiyeedka. Fadlan la xiriir help@916schools.org si aad u waydiiso su'aalo dheeri ah oo ku aadan aaladaha casriga ah ee fasal gaar ah.

QAYBTA SADEXAAD: XEERARKA IYO ANSHAXA

Xaadirista

Xaadirista joogtada ah ee dugsi ayaa toos ula xiriirta guusha shaqada tacliinta, waxay u faa'iideysaa ardayda bulsho ahaan, waxayna siisaa fursado xiriiro muhiim ah looga dhex abuurto macalimiinta iyo ardayda. Waxaan si wayn u dhiiri gelinaa xaadirista joogtada ah ee dugsi si ardaydu ay u yeeshaan habdhaqanno wanaagsan oo ay ku gaaraan koleejka iyo xirfadaha. Xaadirista joogtada ah waa masuuliyad wadareed u dhexaysa ardayga, waalidka/daryeelaha, macalinka, iyo maamulka. [Xeerka 503: Xaadirista Ardayda](#)

Isticmaalka masuuliyadu ku dheehan tahay ee tignooloojiyada

Gelitaanka khayraadka tignooloojiyada degmada iyo interneedka ayaa u sahlaysa ardayda iyo shaqaalaha inay kormeeraan kumanaan maktabadood, kaydada xogta, iyo khayraadka kale inta ay fariimaha kula hadlayaan dadka kale ee aduunka. Hase yeeshee, haddii ardaydu ay sameeyaan falal gaar ah oo sharci daro ah ama masuuliyad daro ah, sida ku cad xeerka gudiga 916, isticmaalkooda tignooloojiyada ayaa la yareyn karaa ama laga joojin karaa. Degmada iyo waalidka/daryeelaha ardayga ayaa eegi kara falalka oonlaynka ee ardayga haddii ardaygu adeegsado khayraadka khayraadka degmada. [Xeerka 524: Xeerka Isticmaalka Masuuliyada leh ee Tignooloojiyada](#)

Isticmaalka masuuliyada leh ee baraha bulshada

Northeast Metropolitan 916 waxay aqoonsan tahay muhiimada su'aalaha, baaritaanka, iyo hal abuurka ayadoo la adeegsanaayo farsamooyinka casriga ah ee kor u qaadaaya khibrada waxbarashada iyo xiriirka isgaarsiinta. Shaqaalaha ayaa adeegsan kara aaladaha

iyo tignooloojiyada baraha bulshada ee degmadu ogolaatay si ay oonlaynka wax ugu bartaan. [Xeerka 524.1: Xeerka Baraha Bulshada](#)

Gardarada

Ardayda ayaa u baahan goob waxbarasho oo badqab iyo taageero siisa si ay u bartaan tacliin iyo xirfado bulsho. 916 waxay ogtahay in xoog sheegashadu ay carqalad ku tahay awooda ardayga ee waxbarashada iyo/ama awooda macalinka ee waxbarista. 916 uma dulqaadato xoog sheegashada ama gardarada loo adeegsado oonlaynka ee shaqsi ama koox arday ah adeegsadaan. Waxay kula xisaabtantaa ardayda, sabab la xiriirta habdhaqankooda dadban, aqbala ama taageera falka garada ah ee arday kale. 916 waxay samaysaa wax kasta oo ay awoodo si ay uga hortagto ayna uga falceliso xoog sheegashada, cagajuglaynta, rabshada, aargoosiga, iyo fal kasta oo kale oo lamid ah. Xeerkaan ayaa sidoo kale qabanaaya shaqaalaha. [Xeerka 514: Xeerka Mamnuucida Xoog sheegashada](#)

Ogeysiiska Falka Rabshada leh ee ay Ardaydu gaystaan

Shaqaaale kalsta ama xubin shaqaale oo kasta oo kamid ah degmada dugsiga kaasoo haya ama hela xog la xiriirta arday kasta oo dhismaha jooga kaasoo lagu yaqaanay falal rabshad ah waa inuu degdeg xogtaas ugu sheegaa maamulaha dhismaha dugsiga ardaygu dhigto. Maamulka ayaa la kulmi doona macalinka fasalka ee hawsha ku shaqada leh iyo shaqaalaha kale ee ay qusayso si loo wargeliyo loona go'aansho sida shaqaaluhu u maareynaayo ardayda noocaas ah. Keliya xubnaha shaqaalaha ee leh xiisaha saxda ah ee waxbarashada ee ku jirta xogta ayaa loo sheegi doonaa. [Xeerka 529: Ogeysiiska Shaqaalaha ee Falka Rabshada leh ee ay Ardaydu gaystaan](#)

Anshaxa Ardayda

Gudiga dugsiga ayaa aqoonsan in masuuliyada gaarka ah iyo qadarinta cid kasta ay muhiim u yihiin bulshada dugsiga kasta. Si loo helo bulshada waxbarashada dugsiga oo badqab iyo kala danbayn leh, dhammaan ardaydu waa inay ogaadaan Xeerka Anshaxa Ardayda. Degmada dugsiga ayaa qaadi doonta talaabada saxda ah ee anshaxa haddii arday ku fashilmo inuu raaco xeerarkan. [Xeerka 506: Anshaxa Ardayda](#)

Dhibaataynta iyo Rabshada

Northeast Metro 916 waxay u taagan tahay abuurista bii'ooyinka waxbarashada iyo shaqada kuwaasoo ka caagan dhibaataynta iyo rabshada ku saleysan isirka, midabka, caqiiqadada, diinta, wadanka, galmada, jinsiga, da;da, xaalada guurka, xaalada qoyska, xaalada qusaysa qaadashada kaalmada dawlada, dookha galmada, ama naafada. 916 waxay baartaa dhammaan cabashooyinka waxayna ka qaadaa talaabo anshax ama talaabo

ku haboon arday, macalin, maamule, ama shaqaale kasta oo jebiya xeerkaan. [Xeerka 413: Dhibaataynta iyo Rabshada](#)

Burcadnimada

Si loo ilaaliyo badqabka goobta waxbarashada, arday, macalin, maamule, mutadawac, qandaraasle, ama shaqaale oo degmada dugsiga ah ayaan loo ogolayn inuu qorsheeyo, hago, dhiiri geliyo, taageero, ama ka shaqeeyo abuurista burcad. 916 waxay baartaa dhammaan cabashooyinka burcada waxayna ka qaadaa talaabo anshax ama talaabo ku haboon arday, macalin, maamule, ama shaqaale kasta oo jebiya xeerkaan. [Xeerka 526: Mamnuucida Burcada](#)

Goob ka Caagan Tubaakada

Northeast Metro 916 waxay ku dedaalaysaa inay noqoto goob waxbarasho iyo shaqo oo ka caagan tubaakada. Xeerkaan ayaa qabanaaya dhammaan xarumaha, haddii ay leedahay, kiraysatay, ama liis ku qaadatay, iyo dhammaan gaadiidka degmada dugsigu leedahay, liis gareysatay, kiraysatay, qandaraaska siisay, ama maamusho. Sidoo kale waxaa ku jira dhammaan dhismaha degmada iyo dhammaan munaasabadaha ka baxsan dhismaha ee ay maamulayso degmada dugsiga. [Xeerka 419: Bii'o ka Caagan Tubaakada](#)

Hubka dugsiga

Northeast Metro 916 waxay samaynaysaa dedaal kasta si ay u xaqiijiso in dugsiyadeeda iyo barnaamijyadeedu ay badqab u leeyihiin dhammaan ardayda, shaqaalaha, iyo dadwaynaha. 916 ayaan u ogolaanayn arday ama qof wayn oo dhismaha dugsiga jooga ama jooga xarunta dugsiga inuu haysto, isticmaalo ama qaybiyo hub. [Xeerka 501: Xeerka Hubka Dugsiga](#)

Takoor La'aanta Galmada

Northeast Metro 916 waxay ku dedaalaysaa inay bixiso waxbarasho loo dhan yahay iyo inay fursado waxbarasho oo siman siiso dhammaan ardayda. Sidaas awgeed, 916 ayaa ka shaqeysa inay ardayda ka difaacdo takoorka ku saleysan jinsiga. [Xeerka 522: Takoor La'aanta Jinsiga ee Ardayda](#)

QAYBTA AFRAAD: CAAFIMAADKA IYO BADQABKA

Habraaca Caadiga ah ee Jawaab celinta

Northeast Metro 916 waxay adeegsataa Hanaanka Jawaab Celinta Caadiga ah (SRP) oo uu abuuray ururka I Love U Guys Foundation si ay ula shaqeyso ciidanka booliiska. Dhismuhu waa fudud yahay - shan talaabo ayaa la qaadi karaa marka xaalad degdeg ah ay jirto: **haynta, sugista, xirista, daadgureynta, iyo xarun iskugu gaynta**. Dugsi ama barnaamij kasta oo degmo dugsiyeedka kamid ah ayaa laga doonayaa inuu sameeyo shan tababarka dabka ah (mid la sameeyo tobanka maalmood ee ugu horeeya), 5 tababarada "Xirista" (Hay, Sug, Xir) ah, iyo hal tababarka cimilada xun ah.

Maqnaanshiyaasha

Waa muhiim inaad sheegto maqnaanshaha ardayda maalin kasta oo ardaygu ka maqnaanaayo dugsiga. Dugsi ama barnaamij kasta ayaa u sheegi doona ardayda iyo qoysaska sida ay u soo sheegayaan maqnaanshiyaasha.

Talaallada

Sharciga Gobalka ayaa u baahan in arday kasta oo dhigta dugsi Minnesota ku yaala laga difaaco cudurada carruurnimada hore ayadoo la siinaayo dhammaan talaallada qasabka ah. Diiwaannada talaalka ayaa la bixin doonaa maalinta koobaad ee dugsiga. Waalidiinta/daryeeyaasha ayaa shardi dhaaf sharci u soo qaadan kara sababo caafimaad ama kuwo diimeed awgood. Shardi dhaafyada caafimaadka ayaa u baahan saxiixa dhakhtar ruqsad leh. Saxiixa nootaayada leh ayaa loogu baahan yahay shardi dhaafka diimeed.

Daawooyinka iyo Habraacyada

Ardayda gaarka ah ayaa u baahan daawo loo qoro ama habraacyada caafimaad ahaan muhiimka ah inta lagu jiro maalinta dugsiga. Dhammaan daawooyinka dhakhtarku qoro iyo kuwa qandho jebinta iyo habraacyada/daawaynada daryeelka caafimaadka gaarka ah ayaa u baahan amarada uu baxshay dhakhtar ruqsad leh. Amaradu waa inay yihiin kuwo buuxa oo gaar ah uuna saxiixaa dhakhtar ruqsad haysta. Waalidka/daryeeluhu waa inuu sidoo kale saxiixaa foomka ogolaanshaha degmada kahor intaan wax daawooyin ah ama daawayn ah la siin. Daawada waa in lagu keenaa qasaca rasmiga ah, ee farmashiyaha oo si sax ah u astaysan. Waalidiinta/daryeeyaasha ayaa laga doonayaa inay keenaan daawooyinka ayna kasoo qaadaan dugsiga. Haddii uu jiro wax isbadel ah oo ku dhaca daawada ama qaabka ama sida ay tahay in loogu maareeyo dugsiga, waa in arintaan loo sheegaa kalkaalisada barnaamijka ama dugsiga ardayga.

Khayraadka Caafimaadka Dhimirka: Care Solace

Northeast Metro 916 waxay ku dedaalaysaa inay bulshada siiso khayraad badan si loo dhawro badqabka iyo caafimaadka. 916 waxay iskaashi la samaysay [Care Solace](#), oo ah barnaamijka isku dubaridka daryeelka caafimaadka dhimirka, si looga caawiyo ardayda iyo qoysaska inay ku xirmaan daryeel tayo leh. Khayraadkaan bilaashka ah waxaa lacagtiisa dhiibaysa oo bixinaysa Northeast Metro 916.

Haddii arday ama xubin kamid ah qoysku uu doonaayo caawimaad ku aadan caafimaadka dhimirka ama isticmaalka maandooriyaha, Care Solace ayaa si degdeg ah oo **QARSOODI AH** ugu helaya dhakhaatiirta la heli karo oo waafaqsan baahiyahaaga. Northeast Metro 916 ayaan marna ka helayn xog shaqsi gaar ah ku saabsan Care Solace. Waxaa jira webseedka Care Solace kaasoo gaar u ah shaqaalaha, ardayda iyo xubnaha qoysaska Northeast Metro 916: caresolace.com/site/916schools.

Khayraadka Caafimaadka Dhimirka: Shabakada Adeegyada Dhalinyarada

[YSNMN.org](#) waa aalad ku shaqeysa webseedka taasoo ka caawisa dhalinta bilaa hooyga ah iyo qareenadooda inay oonlaynka ka raadshaan hooy iyo noocyada kale ee caawimaada.

Khayraadka Caafimaadka Dhimirka: Laynka Isdilka iyo Masiibada

Laynka Gurmada Isdilka iyo Masiibada ee 988 ayaa u taagan inuu siiyo taageerada shucuurta ee masiibada, ayna ku jiraan ku xirista adeegyada gaarka ah ee bulshooyinka kaladuan. Waxaa laga heli karaa 24/7 dhammaan Mareykanka iyo deegaannada qaar ayadoo la wacaayo ama fariin qoraal loo diraayo 988 si lagu caawiyo.

U qalmida Caymiska Caafimaadka ee Minnesota Care

Northeast Metro 916 waxay u dirtaa liiska ardayda u qalma barnaamijka qadada bilaashka ah iyo tan qiimaha jaban Waaxda Waxbarashada Minnesota si loola wadaago Waaxda Adeegyada Dadka ee Minnesota si loogu adeegsado ujeedada kooban ee aqoonsiga ardayda u qalmi kara caawimaada caafimaadka ee Minnesota Care ilaa in waalidka ama masuulka sharciga ah ee ardaygu uu doorto maahee inaan xogtaan u qalmida aysan shaacin degmada dugsigu. Si aad u diido shaacintaan iyo wadaagista xogta, waalidka/masuulku waa inuu ogeysiis qoraal ah u geeyaa maamulaha dugsiga ardayga ama

maamulaha barnaamijka 30 maalmood gudahood maalinta koobaad ee ardaygu xaadiro dugsiga sanad dugsiyeedkaas.

Yareynta Shilalka iyo Dhaawaca

Northeast Metro 916 waxay leedahay barnaamijka qoran ee yareynta shilalka iyo dhaawaca kaasoo qeexaaya sida degmadu uga shaqeynayso yareynta, xakameynta iyo baabi'inta dhaawacyada iyo cudurada ardayda iyo shaqaalaha ee goobta shaqada. Shaqaalaha waxaa laga doonayaa inay soo sheegaan dhaawacyada ama cudurada goobta shaqada una sheegaan maamuleyaashooda isla markaba. Dib u eegista warbixinadaan ayaa la sameeyaa sanad kasta.

Warbixinta qasabka ah

Northeast Metro 916 sharciga ayaa ka doonaaya inay soo sheegto dayaca ama xadgudubka jireed ama galmo ee loo gaysto ilmaha waxayna samayn doontaa arintaas si ay sharciga ugu dhaqanto marka loo baahdo. [Xeerka 414: Soo sheegista Waajibka ah ee Dayaca ama Xadgudubka Jireed ama Glmo ee Ilmaha](#)

Baarisayada

Si loo baxsho busho dugsi oo badqab iyo caafimaad leh, qaanadaha dugsiga iyo miisaska ardaydu waa hanti dugsiyu leeyahay waana la baari karaa ayadoo aan lagala tashan ardayga ama loo helin fasaxa baarista. Saraakiisha dugsiga ayaa samayn kara baaritaannada haddii uu jiro shaki macquul ah oo sheegaaya in la jebiyay xeerarka dugsiga ama sharciyada. [Xeerka 502: Baarista Qaanadaha, Miisaska, Alaabaha Shaqsiga ah ee Ardayda, iyo Shaqsiga](#)

Baaritaannada Daroogada ee Qori tuurka ah

Aad ayay muhiim ugu tahay maamulka iyo gudiga Northeast Metro 916 inay ilaaliyaan goob shaqo iyo dugsiyo ka caagan daroogada. Marka Northeast Metro 916 ay go'aamiso in cadeyn wayn muujinayso in cilado daroogo ka jiraan dhismeyaasha degmada dugsiga, booliiska ayaa samayn kara baaritaannada daroogada ee eeyada loo adeegsado ayadoo aan ogeysiis hore la siin maalinta ama waqtiga baaritaanka. Baaritaan kasta oo daroogada ee eey loo adeegsado ayaa lagu fulin doonaa qaab waafaqsan tababarka iyo habraacyada booliiska. Si Si loo sugo baaritaanka daroogada ee qori-tuurka ah loo adeegsado eeyga ee maalin kasta, muhiim maaha in la qabo shaki gaar ah oo sheegaaya in arday gaar ah uu haysto waxyaabo sharci daro ah. Waad ku mahadsan tihiin dhammaan taageeradiisa xaqiijinta in dugsiyada 916 ay noqdaan kuwo badqab leh oo ka caagan daroogada.

Maadooyinka sunta ah

Wakaalada difaaca bii'ada ayaa ka dooneysa dugsiyada degmada inay sanad kasta u sheegaan waalidiinta/daryeeyaasha iyo shaqaalaha jiritaanka maadooyinka sunta ah gudaha dhismeyaasha degmada iyo shaqooyinka sifaynta ee la qorheeyay. Ma jiraan maadooyinka sunta ah oo yaala dhismeyaasha degmadu leedahay; keliya maadooyinka sunta ayaa yaala Xarunta Waxbarashada ee Bellaire; xarun ruqsad leh. Warbixinnada kormeerka goos-gooska ah ee dhammaan agabka dhismaha ee ay ku jirto maadada asbestos ee xarunta ayaa lagu ilaliyaa xarunta waxbarashada. Marka la baxsho ogeysiis hore, waa la eegi karaa inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah Isniinta-Jimcada. Ma jirto shaqada xakameynta asbestos oo loo mudeeyay sanad dugsiyeedka soo socda. Su'aalaha ku saabsan asbestos waa in loo diraa Xarumaha iyo Maamulaha Shaqooyinka ee 651-415-5568 ama jwood@916schools.org

Tayada hawada gudaha

Northeast Metro 916 waxay diirad adag saaraysaa tayada wanaagsan ee hawada gudaha. Qorshaha maareynta tayada hawada gudaha oo qoran ayaa qeexaaya sida degmadu ula soconayso tayada hawada, u ilaalinayso qalabka, ayna uga jawaabayso walaacyada tayada hawada gudaha.

Xogta ayaa sidoo kale laga heli karaa dhismaha/dayactirka xarunta dugsiya, shaqooyinka nadaafada iyo ilaalinta, isticmaalka kiimikada, xogta qusaysa dhiibada iyo HVAC, iyo kiimikooyinka loo adeegsado hawlaha waxbarashada. Astaamaha dhibaatooyinka tayada gudaha waxaa ku jiri kara madax xanuun, caabuqyada sanko, xiiraxyada, dhuun xanuunka, madax wareer, dawakhaad, duuf, jinanka jirka, ama burukiito. Si loo helo jawaabaha su'aalaha tayada hawada gudaha ama loosoo sheego walaacyada, la xiriiir Maamulaha Xarunaha iyo Hawlgallada oo aad ka wacayso 651-415-5568 ama jwood@916schools.org. Liisaska hubinta ayaa sidoo kale laga heli karaa si ay kaaga caawiyaan si iskaa ah qiimaynta tayada bii'ada shaqada, guriga, iyo bulshada.

QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA BULSHADA

Xeerarka Xogta ee Ogeysiiska Dadwaynah ee FERPA

Northeast Metro 916 waxay ogeysiis siisaa waalidiinta/masuuliyiinta ardayda degmada xuquuqdooda la xiriirta diiwaannada ardayda. Arag [ogeysiisnaan bulshada adoo gujinaaya lifaaqaan](#).

Ogeysiiska Xog Uruurinta ee ku cad Ogeysiiska Dadwaynaha ee PPRA

Northeast Metro 916 waxay u sheegaysaa waalidiinta/daryeeyaasha ardayda xuquuqdooda ku aadan samaynta xog uruurinnada, uruurinta iyo u adeegsiga xogta ujeedooyin suuqgayn iyo baaritaannada gaarka ah ee jirka. Arag [ogeysiisnaan bulshada adoo gujinaaya lifaaqaan](#).

Ogeysiiska PPRA ee Ogolaanshaha/Diidista Hawlaha Gaarka ah

Wax ka Badelka Difaaca Xuquuqda Ardayda (PPRA), 20 U.S.C. § 1232H, ayaa ka doonaaya Northeast Metro 916 inay kuu sheegto ayna hesho ogolaanshaha si ay kuugu ogolaato inaad ardaygaaga ka saarto ka qaybgalka hawlaha gaarka ah ee dugsiga. [Si aad xog dheeri ah uga ogaato, fadlan booqo webseedka soo socda](#).

Xogta Codsiyada Nidaamka Cadaalada Carruurta

Sharciga Xuquuqaha iyo Sirta Waxbarashada ee Qoyska; Minn. Sharciga Xeerarka Ilaalinta Xogta, Minn. Stat. § 13.32, subds. 3(l) iyo 8(a) iyo (b) Si aad u soo degsato foomka codsiga, [fadlan booqo webseedka soo socda](#).